



## Wareeginta Mas'uuliyada Waalidka (DOPA)

Delegation of Parental Authority (DOPA)


### Waa maxay Wareejinta Mas'uuliyada Waalidku (DOPA)?

Wareejinta Mas'uuliyadu Waalidku (DOPA) waa dukumiinti u ogolaada qof kale inuu hayn karo ilmahaaga kolka aadan adigu awoodin inaad haysan karto. Qofka aad siinaynayso ogolaanshahan waxaa "Wakiilka-Idman."

DOPA waxa ay siisaa ogolaansho qof kale uu ku gaari karo go'aano ku saabsan daryeelida ilmahaaga, haynta, iyo hantida. Waxa ay la mid yihiin sidii kuwa aad adigu gaartay oo kale. Taa macnaheedu waa qofka haysta (DOPA) waxa uu ilmahaaga u geyn karaa dhaqtarka si uu u helo daryeel caafimaad. Sidoo kale waxa ay iskuulka uga reebi karaan ilmahaaga waxyaabaha sida, xanuun, balamaha dhaqtarka iyo arrimo kale. (DOPA) ma bixiso ogolaansho lagu go'aansanayo waxyaabaha sida korsi u qaadashada ilmaha ama guur.

(DOPA) kaama qaadayso xaquuqdaada aad go'aan ugu gaari karto ilmahaaga. Waa aad diidi kartaa wixii go'aano ah ee uu qaato qofka ilmaha lagu wareejiyey "(Wakiilka Idman)."

Waxa aad u baahan tahay inaad u sameyso (DOPA) u gaar ah ilmo walba.



### Waa goorma marka aan u baahnahay inaan helo wareejinta mas'uuliyada ilmaha (DOPA)?

(DOPA) waxa ay u fiican yihiin kolka aad ka baxayso gobolka ama wadanka sabab kastaba uga baxe. Waxa ay qayb ka noqon kartaa qorsheyn fasax ama hadii aad qaabilayso masaafurin ama xabsi. Xataa hadii khatar yar uun u tahay waxyaabaha, waxa ay u noqon kartaa gargaar fiican waxyaabaha caynkaa ah ee degdeg ah u dhaca.

Waa inaad u heshaa (DOPA) mid walba oo ilmahaaga ka mid ah hadii:

- Aad qorsheynayso fasax aadid
- Aad gobolka/wadanka aad ugu baxayso muraad
- Khatar aad u tahay masaafurin
- Khatar aad u tahay inaad xabsi aado
- Aad wax walwal ka qabto inaad awoodi waydo inaad daryeesho ilmahaaga mar walba

## Ma inaan maxkamad ka xareystaa arrintan?

Maya. (DOPA) uma baahna in maxkamadi ay ansaxiso. Hase yeeshee, waa inaad hubisaa in waalidka kale ee ilmahu uu og yahay inaad qof kale siinayso ogolaanshahan.

Waa inaad nuqul uga siiso waalidka kale (DOPA) 30-cisho gudahood kolka aad saxiixdo marka laga reebo in:

- Aysan lahayn xaquuqda waqtiga waalidka, ama
- Ay haystaan xaquuqda waqtiga waalidka ee la kormeero ama
- Uu jiro Amar Amaan siin ah si adiga iyo ilmaha waalidka kale la idiin kaga ilaaliyo

## Muddo intee le'eg ayey jirtaa (DOPA)?

(DOPA) waxa ay shaqeysaa hal sanno uun waxa ayna u baahan tahay in lagu hor saxiixso nootaayaale. Waxa aad u baahan tahay inaad sameyso (DOPA) sannad walba. Haddii aad rabto waxa aad ka dhigi kartaa in ka yar muddo hal sanno ah.

Haddii aad doonayso wax intaa ka sii rasmisan, waxaa jira waxyaabo kale oo la kala dooran karo. Kuwaa intooda badani waxa ay qaataan waqti waxa ayna u baahan yihiin ansaxin maxkamadeed. Kala tasho qareen tan.

## Sidee ayaan u sameystaa (DOPA)?

(DOPA) waa khasab inay qoran tahay, taariikhda lagu qoro ka dibna lagu hor saxiixdo nootaayaale. Qofka ilmaha lagu wareerjinayaa (Wakiilka-Idman), isna waa inuu saxiixaa laakiin khasab ma aha inuu ku hor saxiixdo nootaayaale. (DOPA) waxa ay dhaqan geli isla markiiba kolka la saxiixdo lana nooteeyo. Wakiilka-Idmani, waxa uu gaari kartaa markiiba go'aano ku saabsan ilmahaaga.

Waa aad buuxin kartaa foomka ku lifaaqan warqadan xogta aruursan ah. Haddii aadan doonayn inaad isticmaasho foomka, waxa aad qori kartaa warqad aad adigu qoranayso. Qorida warqadu dhib ma leh haddii aad hubiso inay ku jiraan waxa ku qoran magaca ilmaha iyo taariikhda dhalashada, nooca uu yahay ogolaanshaha aad siinayso Wakiilka Idman iyo waqtiga uu ogolaanshahu uu dhacayo haddii aad doonayso in mudadiisu ka yaraato hal sanno. (DOPA) daadu nooc kastaba ha noqotee waa khasab in la saxiixdo lana nootaayeeyo si ay u sharciyeysnaato.



Waxa aad [ka sameyn kartaa DOPA khadka](http://www.lawhelpmn.org/forms) ee [www.lawhelpmn.org/forms](http://www.lawhelpmn.org/forms).  
(ingiriisi kaliya)

- Eeg Qaybta Xeerka Qoyska (Family Law)
- Riix “Delegation of Parental Authority” (*Wareejinta Mas’uuliyada Waalidka*)

Tani waa wareysi talaabo-talaabo ah oo kuu ogolaanaya inaad daabacato foomka oo buuxsan kolka aad dhamaysato hawsha.

## **Ciddee ayaan ugu magacaabi karaa Wakiil-Idman warqada (DOPA) da?**

Sharcigu ma sheego cida aad magacaabi kartid ama aadan u magacaabi karin inay ilmahaaga kuu hayso. Ka sokow in la rabo in qofkaasi uu ka waynaado 18-sanno jir, ma jiraan wax kale oo gaar u cayiman mana jiraan wax muwaadinimo Mareykan (U.S.) oo la iska rabo.

Waxaa aad baahan tahay inaad doorato qof aad ku aamini karto gaarida go'aanada ku saabsan ilmahaaga, oo ah qof ehel ah, saaxiib aad isku dheer tihiin ama qof aad daris tihiin ama qofka weyn oo mas'uul ah. Hubi in qofkaasi uu diyaar u yahay inuu daryeelo ilmaha. Sidoo kale, la socodsii ilmahaaga cidda ay aadi hadii xaalad degdeg ahi ay timaado.

Qofku khasab ma aha inuu muwaadin yahay, laakiin xusuusnow, ma ay awoodi doonaan inay ku wareejiyaan daryeelada ilmaha cid kale hadii ay iyaga wax ku dhacaan. (DOPA) ma aha wax qof kale lagu sii wareejin karo. Kolkaa hadii aad taa ka walwalsan tahay, ka fakar inaad ku qorto qofka kale oo dheeraad ah oo noqda isna Wakiil-Idman oo kale.

Hadii qofka aad doonayso inuu kuu hayo ilmahu uu ku nool yahay gobol kale, waxa aad u baahan tahay inaad hesho foom gobolkaasi leeyahay. (DOPA) Minnesota kaliya waxa ay ka shaqeyaa uun Minnesota. Gobolo badani waxa ay leeyihiin sharciyo la mid ah kuwa halkan iyo foomam kuu ogolaada adiga inaad sameyso isla waxaa. Taa macnaheedu ma aha in aadan ilmahaaga la safri karin, laakiin taasi waxa ay noqon kartaa arrin kale hadii ilmaha loo kaxeeyo gobol kale. Hadii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan ka sameysiga (DOPA) gobol kale, la tasho qareen shati qareenimo ku leh gobolkaa.

## **Maxay tahay in qofka Wakiilka-Idman ahi inuu ogaado?**

Waa muhiin in qofka ah Wakiilka Idmani uu hayo akhbaar ku saabsan ilmahaaga. Kuwani waa liiska akhbaarta aasaasiga ah ee Wakiilka Idmani uu u baahan karo:

- Magaca iyo telefanka iskuulka
- Magaca macallinka, maamulaha iyo/ama hawl-wadeenka
- Akhbaarta Kaarka Caafimaadka
- Magaca iyo telefanada Dhaqatarada, kan ilkaha, iyo xirfadleyaasha kale ee bixiya daryeelada caafimaad
- Akhbaarta Bixiyahada Haynta Ilmaha ee maalintii
- Ku xajiimoodka (dawada, cuntada, ama deegaan)
- Jadwalka Waxyaabaha Maalin walba la qabto iyo xarakaadyada
- Akhbaarta saaxiib lagala xiriiro



Waa ra'yi wacan inaad qorto dhamaan akhbaartan oo dhan ka dibna aad la hayso (DOPA).

Wakiilka Idmani waa inuu ka hayso nuqul (DOPA) si uu u siiyo iskuulka, dhaqatarada, iyo mas'uuliyiinta kale ee u baahan kale cadeyn ah inay ilmaha mas'uul ka yihiin. Sidoo kale waa inay wataan (DOPA) hadii ay ilmaha la safrayaan.

## Siddee ayaan ku joojiyaa (DOPA)?

Waa aad ku joojin kartaa (ka noqosho) (DOPA) qoraal ahaan adigoo ogaysiinaya qofka aad ogolaanshaha siisay in aad ogolaanshihii aad joojinayso. Sidoo kale, dhamaan (DOPA) waxa ay iskood u dhacaan hal sanno ka dib. Hadii aad doonayso inaad joojiso, u sheeg dhaqtarka, iskuulka iyo daryeel-bixiyeyaasha kale ee ilmahaaga.

## Ka waran hadii aanan saxiixi karin foom cusub aanana joogin si aad u daryeelo ilmahaaga?

Hadii aadan saxiixi karin foom cusub laakiin aad wali u baahan tahay in qof kale uu ilmahaaga kuu hayo, Wakiilka Idman waxaa dhici karta inuu awoodi karo inuu u geeyo (DOPA) dhacday maxkamad uuna ka codsato hayn ilmaha ah. Waa ay codsan karaan haynta ilmahaaga ilaa iyo inta aad ka awoodsaysay inaad adigu haysato. Maxkamada ayaa go'aansata waxa ah maslaxada u roon ilmaha iyo in qofka codsanaya hayntu uu yahay qof ku haboon inuu hayo ilmaha.



Hadii aad ka baqayaso in wax degdeg u dhacaan, taa oo ka dhigi karta wax aan suurtagal ahayn inaad adigu daryeesho ilmahaaga, waa ra'yi wacan inaad saxiixdo (DOPA) cusub 6-dii bilood oo kasta intii aad sugi lahayd kan hadda aad haysato inta uu ka dhacayo. Sida ugu fudud ee tan lagu sameyn karaa waa in la buuxiyo (DOPA), marka laga reebo saxiixa, ka dibna laga sameeyo dhowr nuqul oo aan saxiixnayn. Kolkaa looma baahnaan doono inaad dib u qorto mar walba waxa aadna u geysan kartaa nootaale si loo saxiixo.

*Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.

**DELEGATION OF PARENTAL AUTHORITY (DOPA)**

*(Wareejinta Mas'uuliyada Waalidka)*

Delegation of Powers by Parent Minn. Stat. § 524.5-211

*[(Wareejinta Awooda Waalidka (Minn. Stat. § 524.5-211)]*

STATE OF MINNESOTA )  
(GOBOLKA MINNESOTA) )  
 ) ss.  
COUNTY OF \_\_\_\_\_ )  
DEGMADA AH

1. My name is *(Magacaygu waa)* \_\_\_\_\_.  
*(your name) (magacaaga)*  
I am the parent of *(Waxa aan ahayn waalidka)* \_\_\_\_\_.  
*(your child's name) (magaca ilmahaaga)*  
My child's birthdate is *(Taariikhda dhalashada ee Ilmahagu waa)* \_\_\_\_\_.  
*(your child's birthday) (Taariikhda dhalashada ee ilmaha)*

2. I appoint \_\_\_\_\_, to be my legal Attorney  
in-Fact to have parental authority over my child, \_\_\_\_\_,  
*<Waxa aan u magacaabayaa \_\_\_\_\_ inuu noqdo Wakiilkayga- Idman*  
*inuu awood waalidnimo u yeesho ilmahayga, \_\_\_\_\_.*

**Note:** The person you name to care for your child is called the Attorney-in-Fact. That person does not have to be an attorney.

**Ogow:** *qofka aad u magacaabayso inuu ilmagaahga kuu sii hayo waxaa loogu yeeraa Wakiilka-Idman. Qofkaasi khasab ma aha inuu qareen noqdo.*

This DOPA lasts: *(check one) (DOPA dani waxa ay socon:) (calaamadi mid)*

- For one year from the date of my signature  
*(Hal sanno laga bilaabo maalinta la saxiixay)*  
OR *(AMA)*
- until \_\_\_\_\_, *(fill in date)* which is less than one year following the date of my signature.  
*Ilaa iyo \_\_\_\_\_, (Taariikh ku qor) taa oo ah muddo ka yar hal sanno ka dib maalinta saxiixayga lagu qoray.*

3. This DOPA gives my Attorney-in-Fact permission to care for and make decisions about my child named above. These decisions include, but are not limited to:

*DOPA dani waxa ay siisaa Wakiilkayga-Idman ogolaansho ah inuu daryeeli karo uuna gaari karto go'aano ku saabsan ilmahayga magaciisu kor ku xusan yahay. Go'aamadaa waxaa ku jira, laakiin aan ku wada koobnayn:*

- a. Getting medical treatment for my child  
*U helida daryeel caafimaad ilmahayga*
- b. Enrolling my child in school  
*(Qorida ilmahayga iskuul)*
- c. Providing a home, care, and supervision of my child  
*(Siinta ilmahayga hoy, daryeel iyo kormeerid)*

4. This DOPA does not give my Attorney-in-Fact permission to consent to the marriage or adoption of my child.

*(DOPA dani ma siiso Wakiilkayga-Idman ogolaansho uu ku ogolaanaya guurka ama korsasho ilmahayga).*

5. I understand that by law I have to give or mail a copy of this document to any other parent within 30 days of signing it unless:

*(Waxa aan fahamsanahay in sida sharcigu qabo aad ku siiyo ama aan boostada ugu dhigo nuqul qoraalkan ahi waalidka kale 30-cisho gudahood kolka la saxiixo marka laga reebo):*

- a. The other parent does not have parenting time rights or has supervised parenting time rights  
*(Waalidka kale uusan haysan xaquuqda waqtiga waalidnimada ama xaquuqda waqtiga waalidka ee la kormeero)*  
OR (AMA)
- b. There is an existing Order for Protection (OFP) in effect against the other parent that protects me or my child.  
*(Uu jiro amar amaan siin ah si adiga iyo ilmaha waalidka kale la idiin kaga ilaaliyo)*

[SIGNATURES ON FOLLOWING PAGE]

[SAXIIXU WAA BOGGA SOO SOCDA]

**SIGNATURES**  
**(SAXIIXYADA)**

**I swear that everything I have stated in this document is true and correct.**

*(Waxa aan ku dhaaranayaa in wax walba oo aan qoraalkan ku sheegay ay run iyo saxba yihiin)*

**Parent or Guardian:**

*(Waalidka ama Mas'uulka)*

Date *(Taariikhda)*: \_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_ *(sign your name) (Magacaaga ku saxiix)*

\_\_\_\_\_ *(print your name) (Magacaaga ku qor)*

Subscribed and sworn to before me

*(La igu hor Saxiixay la iguna hor dhaartay)*

this \_\_\_\_\_ day of \_\_\_\_\_, 20\_\_\_\_.

*(Maalintan)\_\_\_\_\_ (Taariikhdu ay tahay) \_\_\_\_\_, 20\_\_\_\_.*

\_\_\_\_\_  
Notary Public *(adigoo ah Nootaayaale Dadweyne)*

**Attorney-in-Fact:** *(the Attorney-in-Fact does not have to sign in front of a notary)*

**Wakiilka-Idman:** *(Wakiilka-Idman khasab ma aha inuu ku hor saxiixo naataayaalaha)*

I accept the responsibilities of Attorney-in-Fact for \_\_\_\_\_.

*(Waxa aan aqbalayaa mas'uuliyada Wakiilka-Idman) ee (child's name) (Magaca ilmaha)*

Date *(Taariikhda)*: \_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_ *(Attorney-in-Fact signature) (Saxiixa Waliilka-Idman)*

\_\_\_\_\_ *(Attorney-in-Fact printed name) (Magaca Wakiilka-Idman)*